



Public Health
England

NHS

Hage ku saabsan tallaalka COVID-19 oo loogu talagaley dhammaan dumarka jooga da'da dhalmada, kuwa hadda uurka leh ama naas nuujinaya

Waa in aad kan akhrisaa ka hor inta aadan tallaalka qaadan

Tallaalada COVID-19 ee laga helo UK waxaa la muujiyey in ay wax ku ool yihiin iyo in ay leeyihiin astaamo badbaado wanaagsan. Tallaalada hore ee COVID-19 kuma ay jiraan noole oo jirka ku sii bata, sidaa darteed ma ay sameyn karaan in ay ku ridaan caabuqa cunugaaga aan weli dhallan.

Tallaalo badan ayaa si badbaado leh loo siin karaa dumarka uurka leh maxaa markaas la igula talinayaa in aanan tallaalkan qaadan?

Tallaalada weli laguma tijaabinin dumarka uurka leh, sidaa darteed ilaa macluumaad dheeraad ah laga helo, dumarka uurka leh waa in aysan si caadi ah u qaadan tallaalkan. Waxaa loo baahan yahay caddeymo daraasadaha aan daaweynta aheyn ka hor inta laga bilaabi karo tijaabooyin daaweyn oo lagu sameeyo dumarka uurka leh, inta taa laga gaarayana waa caadi in aan lagu tallin in si caadi ah tallaalka u qaataan inta ay uurka leeyihiin.

Caddaynta daraasadaha aan daaweynta

ahayn ee tallaalka Pfizer BioNTech ayaa la helay oo ay dib u eegtay Hay'adda Nidaaminta Daawooyinka iyo Agabyada Daryeelka Caafimaadka ee (MHRA). caddeyntan waxaa sidoo kale eegey Hay'adda a Caafimaadka Aduunka iyo Hay'adaha nidaaminnada ee ku yaalla USA, Canada iyo Europe wax walaac ahna kama muujin badbaado-qabkeeda waqtiga uurka.

Daraasadaha aan daaweynta aheyn ee tallaalka COVID-19 ee Astra-Zeneca wax walaac ah kama iman.



Tallaalka COVID-19

llaali naftaada



Guddiga Wadajirka ah ee Tallaalka (JCVI) ayaa aqoonsaday in faa'iidooyinka ka iman kara tallaalku ay si gaar ah muhiim ugu yihiin haweenka uurka leh qaarkood. Tan waxaa ka mid ah kuwa halista ugu sareysa ugu jira caabuqa ama kuwa qaba xaalado caafimaad oo iyaga ka dhiga in ay halis sare ugu jiraan in ay la kulmaan dhibaatooyin daran oo ka yimaada COVID-19.

Xaaladahan oo kale, waa in aad kala hadashaa tallaalka dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada, waxaana suurtagal ah in aad dareento in ay fiican tahay in aad qaadato oo aad tallaalka ka hesho ka ilaalin.



Ilmo nuujineysa?

Ma jiraan wax xog ah oo ku saabsan badbaado-qabka tallaalka COVID-19 ee naasnuujinta ama ilmaha naaska nuugaya. Iyada oo ay taasi jirto, tallaalka COVID-19 looma maleynayo in ay khatar ku yihiin ilmaha naaska nuugaya, iyo faa'iidooyinka naasnuujinta ayaa si fiican loo yaqaanaa. Sidaa awgeed, ayaa JCVI ay ku talisey in tallaalka la qaadan karo marka naaska la nuujinayo. Arintani waxay la socotaa talobixinta ka jirta USA iyo midda ka timid Hay'adda Caafimaadka Aduunka.

Maxay tan iiga dhigan tahay?

Waa kuwan qodobbada muhiimka ah ee ay tahay in aad tixgeliso:

- haddii aad uur leedahay waa in aadan is tallaalin illaa aad halis sare ugu jirto mooyee - waa lagu tallaali karaa ka dib marka uurkaagu dhammaado
- haddii aad qaadashada koowaad qaadatey ka dibna aad uur yeelatey, waxaan sidoo kale ku talineynaa in aad qaadashada labaad aad dib u dhigtid ilaa iyo ka dib dhaamaadka uurkaaga (aan ka aheyn in aad halis sare ugu jirtid)

Haddii aad tahay qof haween uur leh, balse aad rumeysan tahay in aad halis sareysa ugu sugan tahay, waxaa markaa suurtagal kuu ah in aad dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada kala hadashid sidaad ku qaadan laheyd ama ku dhameystiri laheyd tallaalka.

In kasta oo aan tallaalka lagu tijaabibin xaaladda uurka, waxaad go'aansan kartaa in khataraha la og yahay ee ka imanaya COVID-19 ay aad u cad yihiin oo aad rabto in aad qaadato tallaalka. Ma jiro talo ku saabsan si looga fogaado uurka ka dib tallaalka COVID-19

Haddii aad naas nuujinaysid, waxaad go'aansan kartaa in aad sugto illaa aad naasnuujinta ka dhammaynayso ka dibna aad tallaalka qaadato.

Tallaalka, wuxuu caawinayaa ilaalinta kuwa ugu nugul.